## Isbeddel lagu sameeyay sharciga ajaanibta laga bilaabo 1.6. – kaasoo saamayn ku yeelan kara macaamiisha haysata badbaadada caalamiga ah

Isbeddel ayaa lagu sameeyay sharciga ajaanibta laga bilaabo 1.6.2025. Isbeddelladaas adiga ayay saamayn kugu yeelan karaan, haddii aad codsanayso magangelyada qaxootinnimo ama aad Finland gudaheeda ku leedahay sharciga badbaadada caalamiga ah. Sharciga cusub wuxuu dhaqangalayaa islamarka uu soo baxo.

## Qoraalka laga sameeyay waraysiga magangelyada laguma khasbana mustaqbalka in si buuxda loo hubiyo

Laga bilaabo 1.6. looma baahna in qoraalka laga sameeyay waraysiga magangelyada si buuxda loo hubiyo.  Arrinkaan waxaa loola jeedaa in shaqaalaha Hoggaanka socdaalka aysan khasab ku ahayn in ay si buuxda kuula eegaan qoraalka laga sameeyay waraysiga. Tani waa mid beekhaaminaysa wakhtiga, islamarkaana dedejinaysa falanqaynta codsiga magangelyada, xittaa dhanka aragtida macmiilka.

Waraysiyada weli waxaa loo duubayaa cod ahaan. Haddii qoraalka laga qoray waraysiga aan si buuxda loo hubin, waxaa laguu siin doonaa wakhti kamadamabays ah oo aad ku soo dirto wixii wax kabeddel ama wax ku kordhin ah ee lagu samaynaayo qoraalka laga sameeyay waraysiga.

## Uma safri kartid dalkaaga hooyo adigoo wata dukumintiga safarka (matkustusasiakirja) ama baasaboorka ajnabiga (muukalaispassi)

Sida uu dhigaayo sharcigan cusub, sida caadiga ah uma safri kartid dalkaagii hooyo ee aad u dhalatay ama dalkii aad sida joogtada ah hore ugu noolayd, adigoo sita dukumintiga safarka (matkustusasiakirja) ama baasaboorka ajnabiga (muukalaispassi).

Isbeddelkaas wuxuu saamayn kugu yeelanayaa, haddii:

- aad tahay qaxootiga la soo qaatay (kiintiöpakolainen)
- aad haysato magangelyo
- aad haysato sharciga degganaanshaha dalka ee lagu saleeyay heerka labaad ee badbaadada (toissijaisen suojelu)
- aad haysato sharciga degganaanshaha dalka ee ku salaysan xiriirka qoyska awgiis, islamarkaana lagu siiyay go'aanka sharciga degganaanshaha dalka ee lagu saleeyay heerka badbaadada.
- aad haysato sharciga degganaanshaha dalka ee lagu saleeyay diidmada dib u celinta (oggolaanshaha lagu saleeyay sharciga ajaanibta ee tirisigiisu yahay 89§).

Waxaad ka heli kartaa Hoggaanka socdaalka dukuminti kuu oggolaanaaya in aad safar ku tagto dalkaagii hooyo haddii ay jirto sabab aad u culus oo keliya. Sababahaas waxaa ka mid noqon kara, tusaale ahaan, xanuun daran oo ku dhacay qof qaraabada ah ama in aad raadsanayso codsiga furriinka. Macluumaadka dheeradka ah ee arrinkaan ku saabsan

waxaad ka akhrisaa cinwaanka internetka ee ah Pakolaisen matkustusasiakirja iyo Muukalaispassi.

## Haddii aad aaddo dalkaagii hooyo Hoggaanka socdaalka waxaa uu arrinkaas u fahmayaa, in aadan mardambe u baahnayn badbaadada caalamiga ah

Sharciga ajaanibta waxaa ku qoran in haddii aad leedahay sharciga qaxootinnimada ama sharciga heerka labaad ee badbaadada (toissijainen suojelu), in safarka aad ugu noqoto dalkaagii hooyo loo arki karo in uu yahay sabab lagu kansali karo sharcigaaga badbaadada caalamiga ah. Xitaa horey waa u jiray arrinka ah, in safarka noocaas ah uu ahaa mid suurtaggal ka dhigaaya in laaga kansalo sharcigii badbaadada.

## Fulinta go’aanka tarxiilka ama dal ka saarista waxaa uu noqonayaa mid la mid ah sida kan dib u celinta

Sida uu dhigaayo Isbeddelka lagu sameeyay sharciga laga bilaabo 1.6, fulinta ama dhaqangelinta dib u celinta (käännyttäminen) iyo tarxiilista ama dal ka saarista (karkottaminen) ee arrimaha khuseeya badbaadada caalamiga ah waa la midaynayaa, waxaana lagu kala saarayaa arrimaha kale ee la xiriira sharciga degganaanshaha.

Tusaale ahaan waxaa lagu siin karaa go’aanka tarxiilis ah ama dal ka saaris ah, haddii aad hore u joogtay Finland adigoo haysta sharci kale oo degganaanshaha dalka ah, islamarkaana aad go’aan diidmo ah ka heshay codsigii magangelyoddoonista ee aad samaysay.

Go’aanka tarxiilista ama dal ka saarista waxaa loola jeedaa, in ay waajib kugu tahay in aad ka baxdo dalka Finland, sida go’aankaba laguugu sheegay. Degdegga ama dhakhsaha lagu fulinaayo go’aanka tarxiilista waxaa ay ku xiran tahay arrinka ah in codsigaagii loo arkay in uu si cad u yahay mid aan wax sabab ah lahayn ama aan la baarin. Booliska ayaa ka mas’uul ah fulinta ama dhaqangelinta go’aanka tarxiilista. Macluumaadka dheeraadka ah ee arrinkaan ku saabsan waxaad ka akhrisaa bogga cinwaankiisu yahay Pakolaisaseman ja toissijaisen suojeluaseman peruuttaminen ja Käännyttäminen, karkottaminen ja maahantulokielto.

## Waxaa lagu siin karaa sharciga badbaadada heerka labaad, halkii lagaa siin lahaa magangelyo qaxootinnimo, haddii aad samayso codsi cusub oo ku salaysan sababo aad adigu abuurtay

Waxaa lagu siin karaa sharciga badbaadada heerka labaad, halkii lagaa siin lahaa magangelyo qaxootinnimo, haddii aad samayso codsi cusub oo ku salaysan sababo aad adigu abuurtay, kaddib markaad ka soo qaxday dalkaagii hooyo, ama dalkii aad sida joogtada ah ugu nooleyd.

Sharciga badbaadada heerka labaad waa lagu siin karaa, haddii aadan soo buuxin shuruudihii lagu heli halaa magangelyada qaxootinnimada. Macluumaadka dheeraadka ah ee arrinkaan ku saabsan waxaad ka akhrisaa bogaggaan internetka: Uusintahakemus iyo Toissijainen suojelu.